

Wargeyska Mountain View

Sateembar 21, 2016

Arbaco, Sateembar 23.....Dugsiga Kaddib Utah Food Bank
Arbaco, Sateembar 28.....Shirarka Ardayga/Macalinka/Waalidka
Qamiis, Sateembar 29.....Shirarka Ardayga/Tababaraha/Waalidka
Qamiis, Sateembar 29.....Maalinta Horay Loo Baxo, Ardayda Tagi Doonaan 12:40
Jimco, Sateembar 30.....Ma Jiro Dugsi
Talaalo, Oktoobar 4.....Shirka Waalidiinta iyo Macmacaanka, 8:30 CLC
Qamiis, Oktoobar 6.....Maalinta Sawirka Dugsiga

Fariinta Agaasimaha

Dhawaan, waxaan qaban doonaa shirarka ardayga/macalinka/waalidka. Waxaan kaa codsaneynaa in aad taageertid caruurtaada, baratid waxa laga filayo dugsiga, iyo in aad ogaatid waxa caruurtaada barato. Waxaan ku faraxsanahay in aan kula qeybsano in aan nahay dugsiga AVID, iyo macnaha taasi u leedahay cunugaada. Macalinka cunugaada wuxuu diyaar u yahay in uu kula qeybsado xiiladaha AVID ee cunugaada ku kaalmeyn doono in uu iminka ku guuleysto dugsiga, iyo in uu isu diyaariyo kulliyadda, goor dambe.

Warqadaha la saxiixo waxaa laga helaa goobada dugsiga si aad isugu qortid waqtiyada kuu roon adiga in aad la kullantid macalinka cunugaada.

Utah Food Bank

Hal mar bishii, Utah Food Bank's Mobile Pantry (Rootiga Bangiga Raashinka Utah) waxay raashin lacag la'aan ah u geyn doontaa ardayda iyo qoysaska Mountain View. Bishaan, baabuurka wuxuu imaan doonaa Sateembar 23, laga bilaabo 3:00 ilaa 4:30 ama ilaa raashinka ka dhamaado. Qaadashada raashinka waxaa lagu qaban doonaa Community Learning Center (Xarunta Waxbarashada Bulshada), ee u dhexeyso Dugsiga Hoose Mountain View) iyo Glendale Middle School (Dugsiga Dhexe Glendale) (1388 South Navago). Tusaalooyinka ku saabsan waxyaabaha aad ku qaadan kartid lacag la'aan waxaa ka mid ah caano fadhiga, caanaha, iyo badarka. Waa kaalmo haddii aad la imaan kartid saddax bac oo guriga loogu qaato raashinka (dambiil iyo sidoo kale gaari).

Waalidiinta iyo Agaasimeyaasha

Agaasimeyaasha waxay jecel yahiin in ay kula kulmaan, kula qeybsadaan waxa ku cusub Mountain View, iyo in ay ka jawaabaan su'aalaha laga yaabo in aad qabtid. Wada hadalkena xiga, Waalidiinta iyo Agaasimeyaasha, waxaa lagu qaban doonaa Community Learning Center (Xarunta Waxbarashada Bulshada) maalinta Talaadada, Oktoobar 4, marka ay tahay 8:30. Waxaan rajeyneynaa in aan halkaas kugu aragno.

Horay u Rawaxaadda Sateembar 29

Maalinta Satember 29, waxaan ardayda ka sii deyn doonaa dugsiga marka ay tahay 12:40 si macalimiinta iyo waalidiinta ugu kulmaan shirarka. Fadlan qorshe u samee caruurtaada waqtigaas. Ma jiro dugsi bisha Sateembar 30 bacdamaa macalimiinta tagi doonaan fasalada horumarinta aqoonta.